# Suaalaha Ardeyga

## Kaararka Wadahadalka ee Lagu Dhisayo Kalsoonida

**Ujeeddo:** Ujeeddada ilo xogeedkaan waa in la helo fikrado su'aalo ah oo ay macallimiintu u adeegsan karaan ardayda luqadaha badan ku hadasha, si ay kalsooni iyo xiriir wadashaqeyn ah ula dhisaan. Tani ma aha liis dhammeystiran oo su'aalo ah, balse waa liis fikrado ah. Su'aalaha waxaa loo qorsheeyey in lagu isticmaalo shaxda ama qaabka kaararka wadahadalka ee WIDA.

**Tilmaamaha:** Dooro dhowr su'aalood oo ku habboon macnaha guud ama samayso mid adiga kuu gaar ah. Uma baahnid inaad isticmaasho sua'aalaha oo idil. Qor su'aalaha aad dooratay in lagu daro qaabka Kaararka Wadahadalka, kaddibna daabac si aad ugu adeegsatid kulanka wadahadalka. Tusaale ahaan, kaararkan waxaa lagu adeegsan karaa kulanka subaxnimo, fasalka guud, fasalka dhexdiisa, munaasabadaha furan, booqashooyinka guryaha, ama dhacdooyinka iyo wadahaladda kale ee rasmiga ah ama aan rasmi ahayn.

**Tixgelinno Marka Loo Adeegsanayo Ardayda, Qoysaska, iyo Xubnaha Bulshada**

- **Heerka Kalsoonida Hadda jirta:** Tixgeli heerka kalsoonida iyo sida uu wanaagsan yahay xiriirka aad la leedahay ardayda, qoysaska, ama xubnaha bulshada. Isticmaalka khasabka ah ee qaabka su'aal iyo jawaab ah marka lagu jiro wejiga hore ee la falgalka ardayda, waalidiinta, ama xubnaha bulshada waxay si aan ula kac ahayn u abuuri kartaa cadaadis, taasoo keeni karta in ay dareemaan isku kalsooni la'aan halkii ay ka heli lahaayeen taageero.
- **Kalsoonidu waxay ku timaadaa siyaabo kala duwan:** Tixgeli ficillo yaryar oo sababi kara in ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ee luqadaha kala duwan ku hadla ay dareemaan soo dhoweyn iyo qiimeyn. Isticmaal salaamo fudud oo ku qoran luqadahooda hooyo. Haddii aad tahay qof bartay Ingiriisiga ama soo-galooti ah, la wadaag waayo-aragnimadaada; haddii aadan taas ahayn, muuji is-hoosaysiin, qadarin luqadaha qoysaska, iyo rabitaan wax-barasho. Tani waxay gacan ka geysaneysaa dhisidda dareenka iyo isku xirnaanta. Xitaa dadaallada yaryar waxay wax weyn ka tari karaan in ay dareemaan in la arkayo oo la aqoonsan yahay.
- **Kalsoonidu waxay qaadataa waqti:** Muuji inaad tahay qof furfuran oo soo dhaweyn leh, isla markaana qiimeeya heerka ay marayaan ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ee luqado badan ku hadla marka ay la falgalayaan. Tani waxay ka dhigan tahay in la dhegaysto sheekooyinka iyo baahiyaha ay qabaan, lagana jawaabo talooyinkooda iyo fikradahooda, lala xiriiro goobo ay iyagu doorbidaan, lagana shaqeeyo abuurista fursado iskaashi oo macno leh. Ka dhig dhisidda xiriirka mid joogto ah oo si ula kac ah loo fuliyo.


WIDA is housed within the School of Education at the University of Wisconsin–Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA

# Su'aalo ay Macallimiintu U Adeegsan Karaan Ardayda

## Bilowga Dhisidda Xiriirka

1. Fadlan la wadaag wax yar oo adiga kugu saabsan.
    a. Waa maxay noocyada waxyaabaha aad jeceshahay inaad samayso?
    b. Waqtigan hadda ah, maxaa kuu ah wax aad si gaar ah ugu faraxsan tahay ama aad ku faanayso?
2. Fadlan wax yar nooga warran qoyskaaga iyo bulshadaada.
    a. Waa maxay waxa ka dhigaya qoyskaaga ama bulshadaada mid kuu qiimo badan ama khaas kuu ah?
3. Ma ii sheegi kartaa luqadaha aad kaga hadasho (guriga, bulshada dhexdeeda, iyo dugsiga)?
    a. Maxaa kuu xiiso leh ama aad ugu faraxsan tahay markaad ku hadasho luqado kala duwan? Sidee ku hadalka wax ka badan hal luqad kuu caawisaa? Ma jiraan waxyaabo adag oo la xiriira arrintaas?
    b. Sidee baad ugu isticmaashaa luqad-da(aha) hooyo dugsiga gudaahiisa?
4. Wax miyaad iga sheegi kartaa dugsigaaga?
    a. Maxaad dugsigaaga ka jeceshahay? Waa maxay maadada aad ugu jeceshahay? Sabab?
    b. Maxaa kugu adag? Waa maxay waxa caawitaan kuu ah kolka uu wax kugu adkaado?
    c. Maxay yihiin waxyaabaha kaa dhigaya inaad dareento in laguugu soo dhoweeyay fasalka ama dugsiga?
    d. Sidee ayuu dugsigaagu ama macallimiintaadu u muujinayaan ixtiraam iyo ka qaybgal ku saabsan asalkaaga luqadeed, dhaqankaaga, iyo nolosha qoyska ee waxbarashada fasalka iyo hawlaha dugsiga?
    e. Waligaa ma dhacday in aad dugsiga ku la kulanto wax xun sabab la xiriirta luqaddaada, dhaqankaaga, ama qoyskaaga? Sideen gacan uga geysan karnaa hubinta inaysan taasi mar kale dhicin?
5. Sifee fasalka ama dugsiga aad aadka u jeceshahay. Siduu buu u ekaan lahaa amaba u qaab ekaan lahaa?

## Horumarinta Xiriir Joogto ah oo Sii Socda

1. Sidee ayay wax u socdaan arrinta aan horey uga wada hadalnay _____? (tusaale ahaan: mashruuca, luqadda, ama waxbarashada.)
2. Miyeey jiraan wax cusub oo aad jeclaan lahayd inaad ka hadasho _____? (waxaad sheegtaa waxyaalo gaar ah oo aad hore uga hadashay.)
3. Sidee kale ayaan ku taageeri karaa?


© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA